

Coronavirus (COVID-19)



Kooxda Utah u Qaabilsan Daryeelka Bulshada ee cudurka COVID-19 waxay si firfircon ula socdaan faafida COVID-19 ilaa heer gobol, qaran iyo mid heer caalamiba.

Si loogu diyaar garoobo cudurka COVID-19, Badhasaab Gary R. Herbert waxa uu soo saaray wareegto iclaaminaysa xaalad degdeg ah 6 dii Maarso.

Jawaab celin la isku dubariday ayaa socota taasoo lagu xadidiyo faafitaanka fayraska. Wakaaladaha gobolka iyo degmada ayaa shirkadaha gaarka loo leeyahay kala shaqaynaya sidii loola socon lahaa xanuunada la xiriira cudurkan cusub ee coronavirus.

Dadka khatarta ugu wayn uu cudurku ku haayo waa



Dadka ka wayn da'da 60



Dadka qaba xaalado caafimaad oo hore

Tallaabooyinka ka hortag ee ugu fiicani waa



gacmaha oo si joogto ah loo dhaqo



in la yareeyo u dhawaanshaha dadka kale

Macluumaad cusub iyo hagiis khusaysa ka hortaga iyo daawaynta, ayaa laga heli karaa coronavirus.utah.gov.

Khadka Macluumaadka Coronavirus ka ee Utah 1-800-456-7707

Qof kastoo dareema xanuun, gaar ahaan hadii astaamaha ay ka mid yihiin



QANDHO



QUFAC



NEEFTA OO QOFKA
KU YARAATA

Waa inaad xaddido u dhawaanshaha adeeg bixiyaashaaga caafimaadka aadna ka wacdaa taleefoon.